WardheerNews
NEWS FROM AFAR!


# Islaam Nacaybka iyo Mooshin 103

**W/Q: Cawaale Xuseen**

**Abril 7, 2017**

---

Dastuurka Kanada waxaa asal ahaan ansixiyey Baarlamaanka Biritishka 1867kii. Isla baarlamaankaa ayunbaana lahaa awoodda wax lagaga badali karo dastuurka. 1980kii ayey Kanada bilowday olole ay awoodda wax ka badallida dastuurka kula soo wareegayso. Guddi baarlamaani ah oo ka socda xisbiyada siyaasadda oo dhan ayaa arintaa loo saaray. Guddigaasi waxa uu tixgaliyey 1,200 oo qoraal, waxa uuna dhagaystay 300 oo doodood. Guddigu waxa uu soo gudbiyey aqoonbaadhis iyo talooyin uu si wanaagsan uga baaraandegay.



Bishii Abriil 17keedii, 1982 ayey boqoradda Ingiriiska Elizabeth II magaalada Ottawa ku sixiixday Xeerka Qaranka Kanada (Canada Act) kaa oo dhigay seeskii u horreeyey ee Axdiga (the Charter) ama Jaartarka. Xilliggaa waxaa dalka Kanada ra'iisul wasaare ka ahaa kaalin muhiim ahna ka galay ansaxinta Axdiga Mudane Pierre Elliott Trudeau.

Bishan Abriil 17keeda waxa uu Jaartarka Xuquuqaha iyo Xorriyadaha ee Kanada (Canadian Charter of Rights and Freedoms) jirsanayaa 35 sano. Waxaa la filayaa dabbaaldegyo badan oo 35 guuradaa lagu maamuusayo. Jaartarkani waxa uu dhawraa xuquuqda dadka Kanadiyaanka ah oo dhan iyada oo aan loo eegin midab, isir, diin, asal, dheddig/lab ahaansho, curyaan ama lixaad dhan, iwm. Jaartarku waa rukun ka mid ah rukumada ay dimoqraadiyada Kanada ku taagan tahay, waxa uuna qalinka ku duugay in Kanada ay tahay dal ay ku nool yihiin dad badan oo dhaqamo kala duwan kala haysta (multicultural country).

Iyaga oo isla tallaabo qaadaya ayey Axdiga iyo Dastuurku dammaanad qaadayaan xuquuqda iyo xorriyadda qof kasta oo Kanadiyaan ah.

**Waa maxay Mooshin-103?**

Maya. Ma aha mooshin laga keenay dawladda curdanka ah ee ra'iisul wasaare Kheyre ee Muqdishu fadhida. Ma aha mooshin baarlamaanka Soomaaliya horyaala. Waa mooshin baarlamaanka Kanada la keenay lana ansaxiyey. Isaga oo ka dabqaadanaya Axdiga ayuu


Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

mooshinku diidan yahay, cambaaraynayaa, dawladda Kanada na ugu baaqayaa in ay tallaabooyin wax ku ool ah ka qaaddo Islaam nacaybka (Islamophobia). Mooshinka summaddiisu waa M-103.

M-103 waxaa baarlamaanka Kanada soo hordhigtay xildhibaanad magaceeda la yidhaahdo Iqra Khaalid bishii Deceember 5teedii, 2016kii. Iqra waa haweeney Muslimad ah oo ka tirsan xisbiga Liberaalka ah ee talada dalka haya, waxaana laga soo doortay degmo ku taalada duleedka magaalada Toronto oo magaceedu yahay Mississauga-Erin Mills.




Mooshinka waxaa la ansaxiyey 23kii Maarso 2017. 201 xildhibaan ayaa u codeeyey, halka ay 91 xildhibaan diideen. Waxaa ka aamusay labo xildhibaan. Baarlamaanka dhexdiisa iyo Kanada oo dhan mooshinkani buuq siyaasadaysan ayuu ka dhaliyey.

Keenidda mooshinka ee baarlamaanka la keenay iyo ansaxintiisa waxaa u dhexeeyey gumaadkii ka dhacday masjid ku yaala magaalada Quebec. Waxaa masjidkaa bishii Jannaayo 29keedii, 2017 soo galay nin caddaan ah oo hubaysan. Ninkaasi waxa uu rasaas oodda kaga qaaday dad Muslimiin ah oo u taagan salaaddii cishaha. Rasaastaasi waxay haleeshay 14 qof. Lix ka mid ahaa 14kaa ayaa qudhoodii ku waayey.

M-103 waa talo soo jeedin (proposal) aan lahayn awood sharci, dhib baajin ama fulineed. Dulucdiisu waa la dagaalanka Islaam nacaybka. Mooshin ahaan iyo sida uu hadda u dhigan yahay marka la qiimeeyo, sharciyada haatan jira ee la dagaalama danbiyada takoorka iyo eexda ku salaysan wax uu maanta kusoo kordhinayaa mooshinkani ma jiro maxaa yeelay qabasho-qanuuneed ama ilko sharci midna ma laha (non-binding).

In kasta oo ay sidaasi dhab tahay, haddana M-103 saddex arimood ayuu dawladda Kanada ugu baaqayaa:

1) In golaha wakiilladu uu cambaareeyo dhammaan takoorada nidaamiga iyo diiniga ah;
2) In ay dawladdu isku daydo in ay xakamayso nacaybka iyo cabsigalinta ku dhisan diinta, isir-xulka ama abtirsiinyo koolkoolinta; iyo
3) In guddiga baarlamaanka ee dhaqanka iyo hidduhu uu diyaariyo daraasad cilmiyeysan oo u kuurgalaysa nacaybka, cunsuriyadda iyo takoorka ku salaysan isirka ama diimaha. Waxaa kuwaa ka mid ah Islaam nacaybka.

Qodobkan dambe waxa uu dhaqangalinayaa uruurin xogo ku saabsan nacaybka iyo takoorka, dabadeedna sideed (8) billood gudahood ayuu gudigu warbixin buuxda kusoo celinayaa golaha wakiillada.


Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved

**Waa maxay doorka M-103?**

M-103 awood sharciyeysan oo uu danbiyada nacaybka ku dhisan wax kaga qabto yaanu lahaanin, laakiin muhiimado ballaadhan oo kale ayuu leeyahay. Muhiimadahaasi waxay isagu jiraan kuwo caalami ah, kuwo dalka Kanada gaar ku ah iyo mid ra'iisul wasaaraha Kanada, Mudane Justin Trudeau, gaar u ah.

Sida la wada og yahay dalalka reer galbeedka baryahan dambe waxaa afuufaysay dabayl siyaasadaysan oo aad mooddo in ay il qalloocan ku eegayso Muslimiinta. Iswiidhan, Faranasiiska, Ingiriiska, Jarmalka (iyo badanka Yurub ta kale), iyo Maraykanka intaba waxaa ka socda dhaqdhaqaaqyo si aan cadli iyo dhexdhexaad midna ahayn Muslimiinta u bidhaansanaya.

Kanada qudheeda falal argagixiso ayaa Muslimiinta lala beegsaday. Sidaan kor ku xusnay masjid magaalada Quebec ku yaala ayaa dad salaaddii cishaha tukanaya oo saf ku jira lagu laayey. Masaajiddo badan ayaa la weeraray, la arbushay, ama hortooda lagu dhigay bannaanbaxyo iyada oo dadka bannaanbaxaya ay kor u hayaan astaamo ay ku qoran yihiin Muslimiintu waa aragagixiso. Labo Jaamacadood oo caan ka ah Kanada oo la kala yidhaahdo Concordia iyo McGill ayaa waxaa loo soo diray qoraalo hanjabaad ah kuwaa oo lagu sababeeyey ardada Muslimiinta ah ee jaamacadahaa dhigta oo badan.

Tusaalayaal badan oo noocaa ah ayaa jira, balse kuwaa kore oo dhacay toddobaadyadii dhawaan ina weydaartay ayeynu isku koobaynaa.

Haddaba iyada oo uu saansaanka siyaasiga ahi sidaa yahay, Muslimiinta badan ee ku dhaqan dalalka reer galbeedkana ay xaalado noocaa ah mutaan, in dawladda Kanada ay ku dhiirrato in ay mooshinkan ansaxiso waxay tusaysaa caalamka in wada noolaashahuhu uu dawladda Kanada muhiimad weyn la leeyahay. Waxaa kale oo ay tusaysaa in aanay Muslimiintu cambaar gooni ah lahayn, iyo in ay jiraan siyaabo kale oo xaalladda loo maarayn karo oo ka duwan "muslimiintu wadankanaga masoo gali karaan" ama "muslimiintu ha na dhaafeen." Waxa uu mooshinku caalamka intiisa kale u diriyaa fariin cod dheer oo odhanaysa Kanada waxay doonaysaa in si ay sinnaani gundhig u tahay loola dhaqmo Muslimiinta, qalaynta iyo dhaleecaynta joogtada ahna laga daayo.

Kaasi waa doorka caalamiga ah ee uu M-103 ciyaari karo.

Muhiimadda uu mooshinkani dalka Kanada ku leeyahay waa mid macnawi ah (symbolic significance). Waxa uu bannaanka soo dhigay cadaawad qarsoonayd.

Dad badan ayaa bannaanbaxyo ay ku diidan yihiin M-103 dhigay. Meelaha bannaanbaxyadu ay ka dhaceen waxaa ka mid ah magaalooyinka Montreal iyo Calgary. Kow iyo sagaashan (91) xildhibaan ayaa diiday oo aan u codaynin M-103. Taasi waxay muujinaysaa in Kanada qudheedu aanay ahayn sida ay isu haysato, in kasta oo ay dadaalayso. Waxaa kale oo ay muujinaysaa in aan fari ka qodnayn faanoole marka laga hadlayo soo dhawaynta, isdhaxgalka


**Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved**

bulshada iyo aqbalaadda qofka u muuqda in uu muuqaal ahaan ka duwan yahay dadka ugu badan ee waddooyinka Kanada lagu arki karo.

Muhiimadda saddexaad waa mid gaar u ah ra'iisul wasaare Justin Trudeau. Dad badani waxay Mudane Trudeau u arkaan in uu yahay hoggaamiyaha kaliya ee reer galbeedka kusoo hadhay ee u taagan waxa ay aaminsan yihiin ama ay muuneeyaan xisbiyada horusocodka ah ama dhinaca bidix u janjeedha.

Haddii ay tahay isku xidhnaanta iyo wada noolaashaha bulsho weynta adduunka, is dhexgalka iyo isu dulqaadashada is ixtiraamka ku dhisan, haddii ay tahay taageeridda Qaramada Midoobay iyo ururada caalaamiga ah, haddii ay tahay daryeelka iyo ilaalinta deegaanka, iwm., waxa uu Mudane JustinTrudeau isu arkaa dad badanina ay la qabaan in, sidii aabihii Mudane Pierre Elliott Trudeau, ay lama huraan tahay in uu caynaanka qabto oo uu afyaal u noqdo xaq-u-sinnaanta iyo horumarinta fursadaha hodontooyo. Waxaa laga filayaa in uu buuxiyo booskii uu madax weyne Obama ugu jiray dadka aaminsan fikirka horusocodka ah (progressive). Taasina waa muhiimadda saddexaad.

**Dadka diiddan M-103 maxay ku doodayaan?**

Dadka diiddan M-103 waxay u badan yihiin dad la habaabiyey oo aan wacaal sax ah ka haynin mooshinku waxa uu yahay ama uu qaban karo. Qaar midab iyo magac faquuqayaal ah oo si ula kac ah hadafka M-103 u qalloocinayana way jiraan.

Waxay si khaldan ugu doodayaan in mooshinku uu lid ku yahay xorriyadda hadalka. In uu ogolaanayo in shareecada Islaamka lagu xukumo Kanada. Waxaa kale oo arrimaha gurracan ee ay ku doodayaan ka mid ah maxaa Islaam nacaybka si gooni ah loogu xusayaa oo Muslimiinta tixgalin iyo mudnaan gaar ah loo siinayaa?

Waxayna ogayn in dawladda Kanada ay in badan hadda ka hor cambaaraysay nacaybka iyo cadaawadda ku wajahan dadyow kale oo badan oo ay ka mid yihiin Yuhuudda, Yaziidiyiinta iyo Qibdhiyiinta Masar. Waxay ka baraad la' yihiin in ay is diidayaan xorriyadda hadalka iyo hadalka hanaayadda huwan ee dhalin kara fal danbiyeed qof ama dad badan lid ku ah.

Mooshinku waxa uu diidayaa takoorka nidaamiga iyo diiniga ah oo dhan. Islaamka waa uu magacdhabay, laakiin kuma uu koobna Islaamka oo kaliya.

Waxaa ka maqan in Jaartarku uu Kanadiyaanka oo dhan u dammaanad qaaday xuquuqda iyo xorriyadaha aasaasiga ah. Waxay moog yihiin ama ay is moogaysiinayaan in Sharciga Xuquuqda Kanadiyaanka (Canadian Bill of Rights, 1960) iyo Sharciga Xuquuqda Dadka ee Kanada (Canadian Human Rights Act, 1977) ay si wadajir ah uga hortagayaan sinjifaquuqa una difaacayeen xuquuqda aasaasiga ah ee muwaaddiniinta tan iyo markii ay sharciga noqdeen.


**Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved**

**Maxaa xiga?**

Nidaamka baarlamaaniga ah marka aynu dib u milicsano, mooshinku waa uu ka duwan yahay waxa loo yaqaano *Bill* ka. Mooshinku sida aan kor ku xusnay waa talo soo jeedin ku aaddan arrin muhiim ah ama danta guud lug ku leh oo uu xubin baarlamaanka ka mid ahi ku hiigsanayo in uu tooshka baarlamaanka ku qabto. Sida ay tahay qaanuun kuma ay noqon karto, laakiin waxay dhali kartaa *Bill* kaa oo sharci (*Act*) noqda. Halka *Bill* ku uu yahay qabyo-qoraal sharci-dejineed haddii baarlamaanku dood ka dib uu qaato sidaa sharci ku noqda labada aqal ee baarlamaankana isu mara.

Sidaa awgeed, M-103 safka ay ku jiraan hawlaha baarlamaanka u yaala, gaar ahaan safka talo soojedinta xubnaha baarlamaanka ee aan afka dawladda ku hadlin, ayuu xagga dambe ka galayaa. Waxaa la filayaa in lagu soo celiyo baarlamaanka horraanta bisha Abriil si ay uga doodaan mar kale. Haddii ay noqoto in si diiwaangashan loogu codeeyo mar kale, waxay codayntaasi dhacaysaa maalinta baarlamaanka lagu soo celiyo Arbacada ka dambaysa.

Arinta ugu muhiimsani waxay tahay M-103 waxa uu u xuubsiiban karaa sharci ama *Bill* qabasho leh oo sharciyada dalka ka mid noqda, qofkii jabiyana uu danbiile noqonayo. Sidaasi waxay iman kartaa haddii ay dawladda haatan jirta ka shaqayso.

Ugu dambayntii, M-103 waa tallaabo wanaagsan oo uu golaha wakiilladu horay u qaaday. Dawladda Liberaalka ah ee talada dalka Kanada haatan haysa, xildhibaanaddii mooshinka baarlamaanka keentay iyo xildhibaanada kale ee taageeray dhammaan ammaan iyo boggaadin ayey mudan yihiin.

Cawaale Xuseen

Email**:** awalle@gmail.com

----------------------

**Tixraac:**

1. Motion 103: http://www.parl.gc.ca/Parliamentarians/en/members/Iqra-Khalid(88849)/Motions?sessionId=152&documentId=8661986
2. Constitution Act (1867): http://laws-lois.justice.gc.ca/eng/const/
3. Canadian Charter of Rights and Freedoms (1982): http://laws-lois.justice.gc.ca/eng/Const/page-15.html
4. Canadian Bill of Rights (1960): http://laws-lois.justice.gc.ca/eng/acts/c-12.3/FullText.html
5. Canadian Human Rights Act (1977): http://laws-lois.justice.gc.ca/eng/acts/H-6/page-1.html


**Copyright © 2017 WardheerNews, All rights reserved**